OGAYSIISKA GUUD EE HAWLAHA ASTURNAANTA

BILAABMAYA 12/19/2022

**MACLUUMAADKAAGA
XUQUUQAHAAGA.
MASUULIYADAHEENA.**

Ogaysiiskani wuxuu qeexayaa sida macluumaadka caafimaad
taas oo lagu aqoonsan karo waa lagu isticmaali karaa waana lagaa shaacin karaa iyo sida aad tahay waxaad marin u heli kartaa macluumaadkan.

Fadlan dib-ugu eeg si dagan.

XUQUUQAHAAGA

Marka ay timaado macluumaadka caafimaadkaaga, waxaad leedahay xuquuqo gaar ah.
Xulitaankani waxa uu sharaxayaa xuquuqahaaga iyo qaar ka mid ah masuuliyadahaaga si uu kuu caawiyo.

Hel nuqul waraaq ama mid electaroonik ah rikoodhka caafimaadkaaga.

- Waxaad codsan kartaa qoraal ahaan si aad u eegto ama aad u hesho warqad elektaroonik ah ama nuqul waraaq oo rikoodhka caafimaadkaaga ah iyo macluumaadka kale ee caafimaadka ee aan hayno. Na waydii sida tan loo sameeyo.
- Waxaan bixin doonaa nuqul ama koobid macluumaadkaaga caafimaad. Waxaad bixin kartaa kharash macquul ah, kharash lacageed.

Na waydii si aad u saxdo rikoodhkaaga caafimaad.

- Waxaad na waydiin kartaa si aad u saxdo macluumaadka caafimaadka ee ku saabsan adiga ee aad u malaynayso in aanu sax ahayn ama aan dhamaystirnayn. Na waydii sida tan loo sameeyo.
- Waxaan odhan karnaa “maya” codsigaaga, laakiin waxaan kuugu sheegi doonaa sababta qoraal ahaan.

Codso wada hadalada gaarka ah.

- Waxaad na waydin kartaa in aan kuula soco xidhiidhno si gaar ah (tusaale ahaan telefoon guri ama xafiis) ama in aan kuugu soo dirno iimayl cinwaan ka duwan.
- Waxaan odhan doona “haa” dhammaan codsiyada macquulka ah.

Na waydii si aan u xadayno waxa aan isticmaalno ama dadka la wadaagno

- Waxaad na waydiin kartaa **in aanan** isticmaalin ama aanan cid la wadaagin macluumaadka caafimaad gaar ee dawaynta, lacagbixinta, ama qaliinadayada.

    - Na loogama baahna in aan kugu waafaqno codsigaaga, oo waxaan odhan karnaa "maya" hadii ay saamayn karto daryeelkaaga.
- Haddii aad bixinayso adeeg ama walax daryeel caamifaad in aad ka wada bixiso jeebka, waxaad na waydiisan kartaa in aanaan faafin warkaasi ujeedada bixinta ama hawlgaladayada caymisyada caafimaadkaaga.
    - Waxaan odhan doonaa "haa" ilaa sharcigu nooga baahan yahay in aan faafino macluumaadka.

Hel liiska kuwan aan la wadaagnay macluumaadka

- Waxaad dalban kartaa liis (xisaabin) wakhtiyada aan faafinay macluumaadkaaga caafimaad lix sano ka hor wakhtiga aad codsatay, cida aan la wadaagnay, iyo sababta.
- Waxaan soo galin doonaa dhammaan bandhigyada marka laga reebo kuwa ku saabsan daawada, lacagbixnta, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka, iyo bardhigyo kale oo gaar ah (mid kasta oo aad na waydiiso in aan samayno). Waxaan ku bixin doonaa hal xisaabin sanadkii bilaash laakiin waxaan qaadi doonaa qiimo macquul ah hadii aad codsato midkale sanad gudihii.

Ka hel nuqul ogaysiiskan gaar ahaaneed

- Waxaad dalban kartaa nuqulka warqad ee ogaysiiskan wakhti kasta, xitaa hadii aad aqbasho in aad ku hesho ogaysiiska elektaroonik ahaan. Waxaan kuu siin doonaa tiiyoo ay la socoto nuqul warqad ah si dagdag ah.

U dooro qof si uu kuu matalo

- Haddii aad siisay qof awooda caafimaad ee qareen nimo ama hadii qof uu yahay ilaaliyahaaga sharci, qofkaasi waxa uu eegayaa xuquuqahaaga oo waxa uu samaynayaa doorashooyin ku saabsan macluumaadkaaga caafimaad.
- Waxaan hubsan doonaa in qofku haysto awoodan oo uu ku matali karo inta aanaan qaadin wax talaabo ah.

Gudbi cabasho hadii aad dareento in xuquuqahaagii la jabiyay

- Waad ka caban kartaa haddii aad dareento inaan ku xad gudubnay xuquuqdaada adoo la xiriiraya UW Daaweynta UW ama Fred Hutchinson Cancer Center Compliance, Ethics & Integrity Program.
- Waxaad sidoo kale dacwad ka gudbin kartaa U.S. Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah iyagoo warqad u diraya 200 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20201, oo wacaya 1.877.696.6775, ama booqanaya www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/complaints/.
- Kaagama aargoosan doono gudbinta cabasho.

IKHTIYAARADAADA

Macluumaadyada caafimaad qaar, waxaad noo sheegi kartaa doorashadaada ku saabsan waxa aan faafinayno.

Hadii aad hayso xigasho cad oo ku saabsan sida aan u baahinay macluumadkaaga xaaladaha hoos ku xusan, nagala hadal. Noo sheeg waxa aad naga doonayso in aan samayno, oo waani raaci tilmaamahaaga.

Waxaad ledahay ikhtiyaarka iyo xuquuqda ladaba in aad noo sheegto:

- Lawadaag macluumaadka waalidkaaga, asxaabta dhaw, iyo kuwa kale ee ku lug leh daryeelkaga.
- La wadaag macluumaadka xaalada dajinta masiibada.
- Kudar macluumaadkaaga agaasime cusbitaal.

Haddii aanad awoodin in aad noo sheegto tixraacaaga, tusaale ahaan hadii aad tahay mid suuxsan, waan sii wadi karnaa oo waxaan la wadaagi karnaa macluumaadkaaga hadii aan isnidhaahno in ay adiga kuu wanaagsantahay. Waxaa kale oo aad faafin kartaa macluumaadkaaga marka loo baahan yahay in lagu yareeyo caqabad wayn oo halis ah oo caafimaad ama badbaado.

Marka laga reebo mooyee, ma wadaagno macluumaadkaaga illaa aad na siiso ogolaansho qoraal ah:

- Ujeedooyinka suuqgaynta
- Iibka macluumaadkaaga
- Faafinta ugu badan ee qoraalada daawaynta maskaxda

Dhinaca maalgalinta:

- Waanu kaala soo xidhiidhi karnaa dadaalada maalgalinta, laakiin waad noo sheegi kartaa in aanaan dib kuula soo xidhiidhin.
- Wixii macluumaad dheeraad ah, eeg: www.uwmedicine.org/about/compliance/patients-and-fundraising

ISTICMAALADAYADA IYO BANDHIGYADAYADA

Sidee ayaan gaar ahaan u isticmaalnaa ama aan u faafinaa macluumaadkaaga?
Waxaan sideedaba isticmaalnaa ama aan u faafinaa macluumaadkaaga caafimaad hababkan soo socda.

Si aan kuu dawayno

- Waxaan la wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaad xirfadlayaasha kale ee ku dawaynaya.

Tusaale: Dhakhtar kaa dawaynaya dhaawac ayaa dhakhtar kale waydiiyay xaalada caafimaad ee guud.

Socodsiin ururkayaga

- Waxaan u adeegsan karnaa isla markaana wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaad si aan u socodsiino howlaheena, hagaajinta daryeelka, iyo kula soo xiriirno marka loo baahdo. Mararka qaarkood waxaan ka saarnaa macluumaadka ku aqoonsan kara si aan u fulino shaqooyinkan.

Tusaale: Waxaan isticmaalnaa macluumaad caafimaad oo kugu saabsan si aan u maarayno daawayntaada iyo adeegyadaada.

Biilka adeegyadaada

- Waxaan u isticmaali karnaa oo aan u faafin karnaa macluumaadkaaga caafimaad si aan lacag uga helno qorshayasha caafimaad ama dhinacyada kale.

Tusaale: Waxaan bixinaa macluumaad ku saabsan adiga iyo qorshaha caymiskaaga caafimaad si ay u bixiso adeegyadaada.

Sidee kale ayaan u isticmaali karnaa ama aan u faafin karnaa macluumaadkaaga caafimaad?
Waxaa na loo ogolyahay ama na looga baahan yahay in aan u faafino macluumaadkaaga habab kale - badanaa habab ka qaybqaata wanaaga dadwaynaha, sida caafimaaka bulshada iyo cilmi baadhista. Waa in aan buuxinaa xaalado badan oo dhinaca sharciga ah ka hor inta aanaan u faafin macluumaadkaaga u jeedooyinkan. Macluumaad dheeraad ah eeg: **www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/index.html**.

Caawinta caafimaadka bulshada iyo arimaha badbaadada

- Waxaan faafin karnaa macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan xaaladaha qaarkood sida:
    - Ka hortagida xanuun
    - Caawinta dibu eegista wax soo saarka
    - Wargalinta dhibaatooyinka dawooyinka
    - Wargalinta faraxumayn laga shakisanyahay, dayac, ama khilaaf guri
    - Ka hortaga ama yaraynta dhibaato halis ah oo qof caafimaadkiisa ama badbaadadiisa

Samayn cilmi baadhis

- Xaaladaha qaarkood, waxaan u isticmaali karnaa ama u wadaagi karnaa macluumaadkaaga cilmi baaris caafimaad. Mashruucyada cilmi baarista ee ku lug leh bukaanada waa in lagu ansixiyaa iyada oo loo marayo nidaam dib u eegis gaar ah si loo ilaaliyo amniga bukaanka, samafalka iyo sirta.

Si aan u raacno sharciga

- Wali waxaan faafinaa macluumaadka ku saabsan adiga hadii xeerka gobolka ama dawladu codsado, tiiyo ay ku jiraan Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Bina- aadamnimo (Department of Health and Human Services) hadii ay doonayso in aan aagno in aan raacayno xeerka asturnaanta ee dawlada.

Si aan uga jawaabno codsiyada bixinta xubnaha ama unugyada

- Waxaan la wadaagi karnaa macluumaad caafimaad ee kugu saabsan adiga ururada baadhida xubnaha.

La shaqeeye baadhe caafimaad ama agaasime xabaaleed.

- Waxaan la wadaagi karnaa macluumaadka caafimaad masuul dawladeed, baadhe caafimaad, ama agaasime xabaaleed marka qofku dhinto.

U abaarno xaqsiinta shaqaalaha, xoojinta sharciga, iyo codsiyada kale ee dawlada

- Waxaan isticmaali karnaa ama aan baahin karnaa macluumaadka caafimaad ee kugu saabsan:
  - Dacwadaha xaqsiinta shaqaalaha.
  - Ujeedooyinka xoojinta sharciga ama masuul xoojin sharci
  - Wakaaladaha kormeerka caafimaadka hawlaha uu ogolado sharcigu
  - Shaqooyinka gaarka ah ee dawlada sida milatariga, amaanka guud, adeegyada ilaalada madaxwaynaha

Uga jawaabno sharciyada iyo talaabooyinka sharci

- Waxaan faafin karnaa macluumaadka caafimaad ee kugu saabsan adiga anaga oo jawaab ka bixinayna amar maxkamad ama amar maamul ama ka jawaabna amarada sharciga.

Ilaalin dheeraad ee macluumaadka caafimaad

- Sharciyo gaar ah ayaa waxay dabaqaan noocyo gaar ah oo macluumadyo caafimaad. Waxaa jira ilaalo sharci oo dheeraad ah oo ku saabsan macluumaadka caafimaad ee xanuunada la isku gudbiyo, rikoodhada mukhaadaraadka dawada iyo alkoosha, rikoodhada caafimaadka maskaxda , iyo macluumaadka HIV/AIDS. Marka uu u baahan yahay sharcigu, ma baahin doono macluumaadka noocan ah anaga oo aan haysan ogolaashahaaga qoraalka ah.
- Xaaladaha qaarkood, macluumaadka bukaanka yar (kayar 18 sano) waxa uu heli karaa ilaalin dheeraad ah.

MASUULIYADEENA

- Waxaa la inooga baahan yahay sharci ahaan in aan sii wadno asturnaanta iyo amaanka maclumaadkaaga caafimaad ee ilaashan.
- Waxan kuu ogaysiin doonaa si dhakhso ah haddii uhogaasami la'aani dhacdo taas oo waxyeeli karta asturnaanta iyo amaanka macluumaadkaaga.
- Waa in aan raacnaa waajibaadyadada iyo waxqabadyada asturnaanta ee lagu qeexay ogaysiiskan oo aan ku siino nuqul kamid ah.
- Ma isticmaali doono ama ma faafin doono macluumaadkaaga aan ahayn sida aan ku qeexnay halkan ilaa aad noo sheegto waan karnaa qoraal ahaan. Haddii aad noo sheegto waan karnaa, waad badali kartaa maskaxdaada markasta. Nagula soo socodsii qoraal ahaan hadii aad badasho fikirkaaga.

Macluumaad dheeraad ah:
www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/noticepp.html.

Isbadalada shuruudaha ogeysiiskan
Waxaan badali karnaa shuruudaha ogaysiiskan, oo isbadaladu waxay dabaqayan dhammaan macluumaad aan kaa hayno adiga. Ogaysiiska cusubi waxa uu ku iman doonaa codsi ahaan, xafiiskayaga, cusbitaal, iyo boggayaga intarnatka.

Ogeysiiskan Wadajirka ah ee Dhaqanada Qarsoonnimada waxay quseysaa UW Medicine iyo Fred Hutchinson Cancer Center, Kaas oo ka shaqeeya xarumaha daryeelka caafimaadka guud ahaan gobolka Puget Sound, iyo shaqaalaha caafimaadka ee xarumahaas.

Daawooyinka UW iyo Fred Hutch ka qaybqaado qabanqaabada daryeelka caafimaadka.In kasta oo labadan hay'adood ay yihiin hay'ado daryeel caafimaad oo gaar ah, waxay wadaagaan macluumaadka bukaanka ee daawaynta, lacag bixinta, iyo hawlgallada la xidhiidha nidaamka daryeelka caafimaadka ee habaysan.

UW Medicine iyo Fred Hutch waxay ka qaybqaataan nidaaminta daryeelka caafimaad ee habaysan. Inkasta oo labadan urur ay kala gaar yihiin, waxay wadaagaan macluumaadka dawaynta bukaanada, lacagbixinta, iyo hawlaha la xidhiidha nidaaminta daryeelka caafimaadka ee habaysan.

UW MEDICINE COMPLIANCE
Box 358049
Seattle, WA 98195-8049
206.543.3098 ama 855.211.6193
comply@uw.edu
uwmedicine.org/nopp

FRED HUTCH COMPLIANCE, ETHICS & INTEGRITY PROGRAM
825 Eastlake Ave E MS: LG-600
P.O. Box 19023
Seattle, WA 98109-1023
206.606.7154 ama 866.353.6098
integrity@seattlecca.org

Rev 9/22